

# Renting in Seattle

# KUSOOGUURIDA GURIGGA

Waxaa jiro macluumaad badan oo aad ubaahantahay inaad ogaato markaad gurigga kusoo guurayso. Waraaqdaan macluumaadku waxay kahadlaysaa raadinta guriga, codsiyada kirada, difaacyada guriyaynta cadaalada ah, qarashaadka sooguurida iyo waxyaabaha ay tahay inaad karaadiso heshiiskaaga kirada iyo gurigaaga cusub.

Booqo [www.seattle.gov/rentinginseattle](http://www.seattle.gov/rentinginseattle) ama wac **Renting in Seattle Helpline (Laynka gurmada ee Renting in Seattle)** adoo kawacaya **(206) 684-5700**

Inaad sooguorto waxaa kahoraysa inaad guri hesho. Dadka guryaha raadsha ee reer Seattle waxay caadiyan adeegsadaan app-yada moobilka iyo baraha oonleenka wax looga baaro si ay uhelaan liiska guryaha banaan. U adeegso baraha bulshada iyo khadadkaaga shaqada iyo kuwaaga shaqsiga ah si aad uhesho macluumaad. Kusoo dhaji xayiisiinada boorarka bulshada ee xaafada uu gurigu kuyaalo. Si aad uhesho liiska dadka bixiya guryaha qiimaha jaban, booqo [www.seattle.gov/findhousing](http://www.seattle.gov/findhousing). Si aad uhesho caawimaad lagaa siiyo qarashaadka sooguurista, wac Community Information Line (Laynka Macluumaadka Bulshada oo ah 211).



City of Seattle

Somali

## Codsashada Kiro

- Udiyaar garoow inaad codsi gudbisato islamarka aad hesho meesha aad rabto inaad guri kakiraysato. Diyaarso macluumaadkaaga damaanada, cadaynta qarashka kusoo gala, iyo dukumiintiyada kale ee caadiyan lagaa doonaayo markaad guri kiraysanayso.
- Mulkiilaha gurigu waa inuu kusiiyaa shuruudaha baarista iyo qodobada ugu yar ee ay tahay inaad buuxiso markaad codsiga kirada dirsanayso si qoraal ahna uu kuugu sheegaa.
- Mulkiilaha gurigu wuxuu kaliya kaaqaadi karaa qarashka caadiga ah ee warbixinta baarista.
- Haddii mulkiiluhu ubaahanyahay *lacagta hormariska ah ee carbuunta* si uu guriga kuugusii hayo intaad marayso shuruudaha codsiga kiraynta, waxaa qasab ah inuu kusiiyo risiid qoraal ah oo qeexaaya shuruudaha iyo xeerarka lagaa rabo inaad raacdo.
- Lacagta carbuunta ah waxaa qasab ah in ayadoo dhamaystiran laguusoo celiyo hadaan lagaa kirayn gurigga ama lagu darin qarashaadka kaaga baxaaya sooguuriida haddii gurigga lagaa kireeyo.



## Guriyayn Cadaalad ah oo Dadkoo dhan Usimanyihiin

- Mulkiilaha gurigu madiidi karo inuu guriga kaakireeyo sabab laxariirta isirkaaga, naafadaada, aqoonsigaaga jinsi, dakhliga aad hesho, da'daada, kaarka guriyaynta ama aqoonsigaaga difaaca leh. Booqo barta [www.seattle.gov/civilrights/civil-rights](http://www.seattle.gov/civilrights/civil-rights) si aad u aragto liiska aqoonsiyada difaaca leh ee kajira Seattle.
- Dadka kirada soocodsada ee taariikhda danbiga soomaray si cadaalad daro ah looguma diidi karo gurigga. Xayaysiinta lagu shaacinaayo guryaha kirada ubanaan laguma xarimi karo dadka kiraystayaasha ah ee soomaray xariga ama xukunka maxkamada inay gurigga kiraystaan.
- Kiraystayaasha naafada ah waxay codsan karaan caawimaado guriga ah oo macquul ah in laga siiyo dhinacyada sida meelaha baakinka gaariga ama isbadalo macquul ah oo lagu sameeyo guriga sida taakooyinka lacuskado ee gurigooda si loogu fududeeyo socodka.
- Mulkiilaha gurigu madiidi karo inuu ufasaxo xayawaanada adeegga siya naafada laakiin wuxuu codsan karaa cadaynta baahida laxariirta naafada oo lagasoo qaaday daryeel bixiye la aqoonsanyahay. Mulkiilaha gurigu qofka wax kama waydiin karo naafadiisa.

## Qarashaadka Sooguurida

Waxaa jiro xadad adag oo u dagan qarashaadka iyo lacagaha carbuunta damaanada ah.

- Qarashaadkaas lagu masoo celin karo. Lacagaha damaanada lagaaga dhigo si buuxda ayaa laguugusoo celinayaa.
- Qarashaadka waxaa *kaliya* lagaaga qaadi karaa baarista iyo/ama nadiifinta gurigga.
- Qarashka guud ee lagaa qaado waa inuusan kabadan 10% kirada hal bil ilaa in qarashka dhabta ah ee baarista codsigaagu kabadanin 10% maahe.
- Lacagaha carbuunta damaanada ah iyo qarashaadka oo layskudaray kama badan karaan lacagta guud ee kirada hal bil.
- Mulkiilaha guriga ayaa kaaqaadi kara damaanad dheeri ah oo laxariirta xayawaanka aad wadato taasoo dhan 25% kirada hal bil.
- Lagahaha carbuunta ah lagama qaadi karo xayawaanka naafada u adeegga.
- Mulkiilaha guriga ayaa sidoo kale kaaqaadi kara lacagta bishii hore oo hormaris ah.



### TUSAALAHA 1:

Lee waa qof kaligiis dagan gurigga. Kirada uu baxshaa waa \$1,000 bishiiba.

Mulkiilaha guriga ayaa kaqaada Lee \$45 (lacagta baarista ah) + \$55 (oo qarashka nadiifinta ah) + \$90 (carbuunta damaanada ah) waxayna iskunoqdaan \$1,000.

KIRADA BILAHA AH	\$1000
CARBUUNTA DAMAANADA AH	900
QARASHKA NADIIFINTA	55
QARASHKA BAARISTA CODSIGA	45

### KIRADA BILAHA AH \$2000

CARBUUNTA DAMAANADA AH	1800
QARASHKA NADIIFINTA	110
QARASHKA BAARISTA CODSIGA	90
CARBUUNTA DAMAANADA XAYAWAANKA	500

### TUSAALAHA 2:

Tracy iyo Morgan oo ay lajiraan labadooda ilmood ayaa ah qoys kakooban afar qof. Waxay leeyihiin eey iyo biisad. Kirada ay baxshaan waa \$2,000 bishiiba.

Mulkiilaha guriga ayaa kaqaada Lee \$90 ((\$45 x 2 lacagta baarista ah) + \$110 (oo qarashka nadiifinta ah) + \$1,800 (carbuunta damaanada ah) waxayna iskunoqdaan \$2,000. Mulkiilaha guriga ayaa sidoo kale kaqaadi kara qarash dheeri ah oo dhan \$500 (qarashka xayawaanka ay wataan)

## Qarashaadka Hormariska ah

- Waxaad dooran kartaa inaad dhiibto qarashaadkaaga sooguurista, carbuunta, qarashka damaanada xayawaanka, iyo kirada bishii lasoo dhaafay oo hormaris ah dhamaantood.
- Dookhyada lacag bixinta hormariska ah waxay kuxiranyihiin muddada heshiiskaaga kirada ama waxaa lagu jadwalayn karaa heshiis labo geesood ah oo aad lagasho mulkiilaha gurigga aad kiraysanayso.
- Mulkiiluhu madiidi karo inuu guriga kaa kireeyo sababo laxariira inaad lacagta hormaris kudhiibto wax lacag dheeri ahna kuguma saari karo sabab laxariirto dookhaaga.

## Liiska hawlaha Sooguurida

- Mulkiilaha gurigu waa inuu kusiiyaa liiska qoran oo sharaxaaya xaalada guriga aad kiraysanayso kahor intuuusan kaaqaadin lacagta carbuunta ah.
- Si taxadar leh u akhri liiska si aad uhesho war toosan kadibna aad wax uga badesho meelaha loobaahanyahay in isbadal lagu sameeyo kahor intiinaan adigga iyo mulkiiluhuba wada saxiixin oo iinaan taariikhda kuqorin heshiiska kirada. Xaqiiji inaad haysato koobiga macluumaadka.
- Markaad guriga kaguurto, mulkiilaha gurigu waa inuu adeegsadaa liiska xaaladaha guriga si uu go'aan uga gaaro jiritaanka wax dhibaato ah oo guriga kudhacay.
- Mulkiilaha gurigu waa inuu sidoo kale kusiiyaa koobiga *Information for Tenants (Macluumaadka Kiraystaha)*, oo ah faahfaahinta kooban ee xaquuqaha iyo waajibaadka mulkiilaha iyo kiraystaha oo ay samaysay Magaalada Seattle. Foomka diiwaangalinta codeeyaha ayaa lasocda. Ha hilmaamin inaad is diiwaangeliso si aad u Codayso deegaankaaga cusub!



## Furayaasha Guusha

Kahor intaadan saxiixin heshiiska kirada, waa inaad fahantaa shuruudaha iyo xeerarka aad raacayso. Raadi arimaha soosocda:

- Waa muddo intee le'eg xiliga kiradu?
- Sidee ayuu heshiiskaaga kiradu kudhamaan karaa?
- Xaq ma uleedahay dookh aad kucusboonaysiiso mudada kirada?
- Mabixinaysaa qarashaadka adeegyada gurigga ama qarashaad kale?
- Waa maxay xeerarka kadagsan soodhawaynta martida?

Talo raadso haddii aad ubaahantahay in lagaa caawiyo fahanka heshiiska kirada. Gasho koobiga macluumaadka meel amaan ah si dib ugu laabato markaad ubaahato. Waxaad xaq uleedahay hal koobiga badalida ah oo bilaash ah inuu kusiiyo mulkiilaha gurigaagu.



## GURIGGA KIRADA AH Madiiwaangashanyahay?

- Guryaha kirada ah waa in laga diiwaangashaa Magaalada Seattle, ayadoo ay jiraan dhawr arimood lagasoo reebaayo shardigaas. Waxaad ogaan kartaa haddii guriga aad dagantahay diiwaan gashanyahay ama ay ubaahantahay in ladiiwaangasho adoo galaaya [seattle.gov/rrio](http://seattle.gov/rrio) (kadiba dhagsii barta kiraystaha).
- Guryaha kirada ah waa inay buuxshaan shuruudaha ugu yar ee kirada ayna yihiin kuwo badqaba. Waxyaabaha qaar ee ay tahay inaad hubiso:
  - Qalabka qiiqa iyo monoxide ka sheega
  - Daaqadaha furan iyo kuwa xiran
  - Qufulada adag ee albaabada lagasoo galo guriga
  - Isha dabka kusiisa ee rasmiga ah
  - Daaqadaha qolalka jiifka



## City of Seattle

[Seattle.gov/rentinginseattle](http://Seattle.gov/rentinginseattle)

Laynka gurmada (206) 684-5700



Magalaada Seattle waxay aaminsantahay iskudhafnaanta iyo sinaanta dadka. Dadka soogalootiga ah iyo qaxootiyaasha waa lagusoo dhawaynayaa magaalada. Shaqaalaha magaaladu dadka mawaydiiyaan sharcigooda muwaadinimada waxayna ushaqeeyaan dhamaan dadka dagan magaalada ayadoon loofiirnayn inay soogalooti yihiin iyo inkale.

Haddii aad tahay qof naafo ah aadna doonayso inaan macluumaad kugu siino qaab kale fadlan soowac laynkeena gurmada. Laynkeena TTY (Dadka Dhagaha La') waa (206) 233-7156.

**Adeegyada turjumaanka ayaa markasta diyaar ah. Dukumiintigaan waxaad kuhelaysaa luuqadaha:**

English • Español • Oromiffa • af-Soomaali • አማርኛ • ສາສາໂຊນ • 中文 • 한국어 • ພາສາລາວ  
русский язык • ภาษาไทย • ភាសាខ្មែរ • Tiếng Việt

